



Cabot's core values are:
Partnership Inclusion Excellence



Cabot Primary School

Learn together, respect each other, achieve forever

www.cabot.excalibur.org.uk

Talaada 18^{da} Noofember 2025

Gacaliyayaal Qoysas,

Xilliga wuxuu noogu billaawday si wanaagsan, House Captains-keenna la doortay xilligii hore ayaa hoggaaminaayaan kulannada guud, waxaan ka qeyb qaadannay Usbuuca Ka-Hortagga-Xadgudubka, fasalka 4^{aad} waxay booqasho ku tageen Roman Baths.

Waxaa kaloo aan u riyaanay inaan kugula kulanno waqtigii La-tashiga Qoysaska, aad ayey muhiim u tahay inaan si wadajir ah u shaqeyno si aan u xaqiijino in carruurta helaan waxbarashada ugu wanaagsan ee aan bixin karno. Sidoo kale aad ayey u wanaagsanayd inaan aragno qoysaska qaar oo ka soo qeyb galay Subaxa Qaxwada Caafimaadka Maskaxda oo ay hoggaamineysay, Xirfadlaheenna Caafimaadka Maskaxda.

Waxaan dhawreynaa xilli mashquul ah oo ay dhacaayaan waxbarasho wanaagsan, booqashooyin kale iyo dabbaaldega bandhigga qaboobaha oo nagu soo fool leh. Fadlan ka caawi canuggaada in uu waqtigii la rabay uu ku yimaado dugsiga si ay uga qeyb galaan waxbarashada subixii ayna maalinta ugu billaabato iyagoo diyaar ah u waxbarasho maalin dhan ah. Albaabka cagaaran ee jidka xiga wuxuu furmaayaa 8:35, iyadoo albaabka buluugga ahna uu furmaayo 8:40 si carruurta u helaan waqti ay fasalladooda ugu xasilaan iyadoo maalinta ay billaabaneysa 8:45. Is-xaadirinta fasalka waxay dhammaaneysaa 8:50 markaas oo ay albabada xirmaayaan. Intaas ka gadaal, dhamaan carruurta imaaneyso waqtigaas ka dib waa in ay ka soo galaan dhinca xafiiska si loogu qoro diiwaangeliyaha (register) iyadoo loogu qoraaya daahid. Usbuuca dambe waxaa jiri doona subaxa qaxwada 25^{ta} oo ku saabsan imaanshaha iyo waqti-ku-imaanshaha.

Fadlan ka fiiri lifaaqa xayeysiin ku saabsan wanaagga iyo dhibaatooyinka la xiriira wada-hadal-kooxeedka-internetka. Waxaan rabnaa in carruurteenna oo dhan ay ahaadaan kugu ku nabdoon internetka.

Mahadsanidiin,
Mrs L-H

Cod-Bixintii House Captain

Hambalyo fasalka 6 kuwaasoo isu soo sharraxay jagada House Captain – dhammaantiin si wanaagsan ayaa hadalladiinna ugu soo bandhigteen kulanka guud, aad ayaanna maqsuud idinkaga nahay. Dhammaan dugsigu waa cod-bixiyey, annagana waxaan ku faraxsannahay inaan caddeeyno House Captains-keenna iyo Ku-Xigeennadooda sannadka, kuwaasoo kala ah:

Avon – KJ HC iyo Abdullah VHC
Clifton – Sidra HC iyo San VHC
Peros – ZamZam HC iyo Marwa VHC
Severn – Sumeya HC iyo Maida VHC

Taariikhaha Xusuus-Qorka

25^{ta} Nof. Subaxa Qaxwaha ay hoggaaminaayaan Kooxda caawinaadda Caafimaadka Maskaxda

17^{da} Dis. – KS1 bandhigga waqtiga qaboobaha ee qoysaska .

18^{da} Dis – Qadada Kiristimaska.

19^{ka} Dis – Maalinta ugu dambaysa Xilliga.

u/b 22^{da} Dis iyo 29^{ka} Dis fasaxa qaboobaha.

5^{ta} Jan – Maalin INSET– dugsii ma jiro.

6^{da} Jan – Ku soo laabashada dugsiga.



Imaanshaha

Celceliska imaanshaha dugsiga oo dhan wuxuu usbuucii hore ahaa **94%** kaasoo u dhaw **96% yoolkeennii**. Aad ayaad ugu mahadsan tihiin caawinaaddiina arrintaan ku saabsan. **Fasallada Risebshanka iyo 6 waxay dhaafeen Yoolkeennii 96%.**

Waxaan ognahay in filashada Dowladda iyo Cabotay yihiin in carruurta dugsiga yimaadaan maalin walba marka laga reebo marka ay aad u xanuusan yihiin.

Haddii canuggaada uu buko uuna dugsiga imaan karin, fadlan xafiiska dugsiga kala soo xiriir 01173772630 si aad noogu sheegto. Waxaa laga yaabaa in aan guriga kugu soo booqanno haddii aan war kaa helin waxaana laga yaabaa in aan sameyno booqasho bad-qab hubin haddii uu canuggaada maalmo badan xanuunsan yahay.

Fasaxyada waa in tikidka la goostaa waqtiga uu dugsii fasax yahay, ganaax ayey kuu soo diri kartaa Xukuumadda Deegaanka haddii canuggaada uu dugsiga imaaneynin. Ma dooneyno in mid ka mid ah caruurta uu seego xaqooda

Su'aalaha Guddiga Akadeemiyada

Waan kaaga mahadcelin lahayn haddii aad daqiiqado yar aad ku bixiso buuxinta su'aalaha qoyska. Dib-u-soo-warbixintaada. Runtii aad ayey muhiim noogu tahay waxayna na siineysaa akhbaar ku saabsan sidii aan u caawini lahayn canuggaada/carruurtaada dugsiga.

Fadlan riix mareegtaan, furna: [Cabot Primary School - Family Questionnaire Term 2 2025 – Fill out form](#)

Su'aalaha waxay halkaan ku jiraayaan ilaa iyo dhammaadka maalinta Isniinta 24 November 2025.

Aad ayaad ugu mahadsan tahay waqtigaada.

Heesaha

Tan waxay noqotay mid caan ah waxaana jeclaan lahayn carruur badan in ay ka qeyb qaataan. Waxaan dhawreynaa bandhigooda ka dhici doona Bristol Beacon xilliga dabayaaqadiisa.

Waxaan jeclaan lahayn inaan warsidahaan ku soo saarno luqadaha bulshadeenna – haddii aad naga caawini kartid inaad ku tarjumto warsidahaan luqaddaada hooyo, fadlan ogeysii xafiiska. Waxaad naga soo wici kartaa 01173772630